

**XAASHIDA XAQIIQDA EE LOOGU TALAGALAY DADKA DARYEELKA
LA SIIYO IYO DARYEEL BIXIYEYAASHA
OGGOLAANSHAHA ISTICMAALKA DEGDEGGA AH EETALLAALKA MODERNA
EE COVID-19, IYO TALLAALKA MODERNA EE COVID-19, LA CUSBOONEYSIIYAY
(TALLAALKA ASALKA AH IYO OMICRON BA.4/BA.5) SI LOOGA HORTAGO
CUDURKA KORONA FAYRAS 2019 (COVID-19)**

6 BILOOD JIRKA ILAA 5 SANO JIRKA

Waxaa ilmahaaga loo soo bandhigayaa Tallaalka Moderna ee COVID-19, ama Tallalka Moderna ee COVID-19, La Cusbooneysiiyay (Tallaalka Asalka ah iyo Omicron BA.4/BA.5), halkan wixii ka dambeeya loogu yeeri doono Tallaalka Moderna ee COVID-19, La Cusbooneysiiyay, si looga hortago Cudurka Korona Fayras 2019 (COVID-19) ee uu keeno caabuqa SARS-CoV-2.

Xaashidaan Xaqiiqda ee loogu talagalay Dadka Qaata iyo Bixiyeyaasha Tallaalka waxay ka kooban tahay Xaashida Xaqiiqda ee loogu talagalay Tallaalka Moderna ee COVID-19 iyo Tallaalka Moderna ee COVID-19, La Cusbooneysiiyay ee loogu talagalay dadka jira 6 bilood ilaa 5 sano jir.¹

Tallaalka Moderna ee COVID-19 ayaa Oggolaanshaha Isticmaalka Degdegga ah (EUA) ka helay FDA si loo bixiyo:

- **laba garoojo oo isxigiga oo aasaasi ah oo loogu talagalay shakhsiyaadka da'doodu tahay 6 bilood ilaa 5 sano jir; iyo**
- **garoojo taxane ah oo aasaasi ah oo saddexaad dadka da'doodu tahay 6 bilood ilaa 5 sano jir ee qaba noocyo gaar ah oo liidashada difaaca jirka.**

Tallaalka Moderna ee COVID-19, La Cusbooneysiiyay ayaa Oggolaanshaha Isticmaalka Degdegga ah (EUA) ka helay FDA si loo siiyo hal garoojo oo xoojin ah shakhsiyaadka da'doodu tahay 6 bilood ilaa 5 sano jir ugu yaraan 2 bilood kadib markay qaataan tallaalkooda aasaasiga ah ee Tallaalka Moderna ee COVID-19.

Tallaalka Moderna ee COVID-19 iyo Tallaalka Moderna ee COVID-19, La Cusbooneysiiyay ma aysan u ansixin FDA inay la siiyo shakhsiyaadka da'doodu tahay 6 bilood ilaa 5 sano jir.

Xaashidan Xaqiiqda waxay ka kooban tahay macluumaad kaa caawinaya inaad fahamto khataraha iyo macaashyada Tallaalka Moderna ee COVID-19 iyo Tallaalka Moderna ee COVID-

¹ Waxaa dhici karta inaad hesho Xaashidan Xaqiiqda xitaa haddii ilmahaagu yahay 6 sano jir. Carruurta da'doodu ka gudbayso 5 sano una gudbayso 6 sano inta udhaxeysa garoojooyinka tallaalka isxigiga ee aasaasiga ah ayaa heli doonaan, garoojo kasta oo ka mid ah tallaalka isxigiga ee aasaasiga ah, midkood: (1) Tallaalka Moderna ee COVID-19 ee la oggolaaday si loo siiyo shakhsiyaadka da'doodu tahay 6 bilood ilaa 5 sano; ama (2) Tallaalka Moderna COVID-19 ee la oggolaaday si loo siiyo shakhsiyaadka da'doodu tahay 6 sano ilaa 11 sano.

19, La Cusbooneysiiyay, kaasoo ay dhici karto in canugaagu qaato maadaama hadda uu jiro safmareenka COVID-19. La hadal bixiyaha tallaalka ee canugaaga haddii aad qabto su'aalo.

Tallaalka Moderna ee COVID-19, iyo Tallaalka Moderna ee COVID-19, La Cusbooneysiiyay ma difaaci karaan qof walba.

Xaanshidaan Xaqiiqda waxaa laga yaabaa in la cusbooneysiiyay. Si aad u hesho Xaanshida Xaqiiqda ee ugu dambeysay, fadlan booqo www.modernatx.com/covid19vaccine-eua.

WAXA AY TAHAY INAAD OGAATO KAHOR INTA ILMAHAAGU UUSAN QAADAN

TALLAALKAN

WAA MAXAY COVID-19?

COVID-19 — waxaa sababa fayraska korona ee lagu magacaabo SARS-CoV-2. Noocaan coronavirus-ka ah horay looma arag. Waxaad ka qaadi kartaa COVID-19 taabashada qof kale oo qaba fayraska. Badi waa xanuun neef mareenka ku dhaca laakiin sidoo kale saamayn kara xubnaha kale. Dadka qaba COVID-19 waxay yeeshaan astaamo badan sida la soo weriyo, kuwaasoo ka bilaabma astaamo fudud ilaa jirrooyin daran. Astaamuhu waxay soo bixi karaan 2 ilaa 14 maalmood kadib markaad u baylahdo fayraska. Astaamuhu waxaa ku jira: qandho ama qarqaryo; qufac; neefta oo kugu yar; daal; murqo ama jir xannuun, madax xanuun; lumida cusub ee dhadhanka ama urta; cune xanuun; calool istaag ama sanko oo diif ka dareerayo; lallabo ama mantag; shuban.

MAXAA XIRIIR AH OO KA DHEXEYEA TALLAALKA MODERNA EE COVID-19, IYO TALLAALKA MODERNA EE COVID-19, LA CUSBOONEYSIIYAY?

Tallaalka Moderna COVID-19, La Cusbooneysiiyay waxaa loo sameeyay si la mid ah sida Tallaalka Moderna COVID-19, balse wuxuu sidoo kale ka kooban yahay qayb ahaan tallaalka Omicron si uu gacan uga geysto kahortagga COVID-19 ee ay keenaan noocyada caabuqa ee Omicron ee SARS-CoV-2.

Si aad u hesho xog badan oo ku saabsan EUA, eeg “**Waa maxay Ogolaanshaha Isticmaalka Xaaladda Degdegga ah (EUA)?**” qeybta ah dhammaadka Xaashidaan Xaqiiqada.

WAA MAXAY WAXAA AAD U SHEEGI LAHAYD BIXIYAHA TALLAALKA CANUGAAGA KAHOR INTA UUSAN ILMAHAAGU QAADAN MID KA MID AH TALLAALADAAN?

U sheeg bixiyaha tallaalka dhammaan xaaladaha caafimaadka ee canugaaga, oo ay kujiraan haddii canugaaga:

- uu qabo wax xasaasiyad ah
- uu qabo bararka murqaha wadnaha (caabuqa muruqa wadnaha) ama (bararka xuubka sare ee wadnaha)
- uu qabo qandho
- uu qabo cillad dhanka dhiigbaxa ah ama uu qaato daawo dhiigga khafiifiso
- uu qabo liidasho dhanka difaaca jirka ah ama qaato daawooyin saameeya nidaamkaaga difaaca ee canugaaga

- uu qaatay tallaalka kale oo loogu talagalay COVID-19
- waligii mar un suuxay kadib markii cirbad lagu duray

YAY TAHAY INAYSAN AADAN TALLAALKA MODERNA EE COVID-19, IYO TALLAALKA MODERNA EE COVID-19, LA CUSBOONEYSIIYAY?

Waa inuusan canugaagu qaadan wax ka mid ah tallaaladaan hadduu ilmahaagu:

- qaaday xasaasiyad daran kadib markii aad qaadatay garoojo hore Tallaalka Moderna ee COVID-19
- qaaday falcelin xasaasiyadeed oo daran kadib markaad qaadatay maaddo kuj irta tallaaladaan

WAA MAXAY WAXYAALAHA KU JIRA TALLAALADAN?

Tallaalka Moderna ee COVID-19, iyo Tallaalka Moderna ee COVID-19, La Cusbooneysiiyay waxay ka kooban yihiin maaddooyinka soo socda: aasiidka bu'da unugga iyo dheecaanada (mRNA), duxda (SM-102, polyethylene glycol [PEG] 2000 dimyristoyl glycerol [DMG], cholesterol, and 1,2-distearoyl-sn-glycero-3-phosphocholine [DSPC]), tromethamine, maaddada tromethamine hydrochloride, assidhka acetic acid, sodium acetate trihydrate, iyo sukrows.

SIDEE LOO QAATAA TALLAALADAN?

Tallaalka Moderna ee COVID-19, ama Tallaalka Moderna ee COVID-19, La Cusbooneysiiyay ayaa laga siin doonaa ilmahaaga muruqa ayadoo cirbad lagu durayo.

Tallaalka Isxigxiga ee Aasaasiga ah: Tallaalka Moderna COVID-19 waxaa loo bixiyaa laba garoojo oo tallaalka isxigxiga ah ahaan, oo ay u dhexayso 1 bil. Garoojada saddexaad ee tallaalka isxigxiga ee aasaasiga ah ayaa laga yaabaa in la siiyo ugu yaraan 1 bil kadib garoojada labaad ee la siiyo shakhsiyaadka qaba noocyada gaarka ah ee difaaca jirka ee liita.

Garoojo Xoojin ah: Tallaalka Moderna COVID-19, La Cusbooneysiiyay ayaa loo bixiyaa hal garoojo oo xoojin ah ahaan ugu yaraan 2 bilood kadib qaadashada tallaalka aasaasiga ah ee Tallaalka Moderna ee COVID-19.

TALLAALADAN HOREY MA LOO ISTICMAALAY?

Malaayiin qof oo 6 bilood jir iyo wixii ka weyn ah ayaa qaateen Tallaalka Moderna ee COVID-19 iyadoo la adeegsanayo Oggolaanshaha Isticmaalka Degdegga ah (EUA). Baritaannada caafimaad ayaa lagu sheegay, qiyaastii 5,000 oo qof oo jirta 6 bilood ilaa 5 sano jir inay qaateen ugu yaraan 1 garoojo oo Tallaalka Moderna ee COVID-19. Tijaabooyinka caafimaad ayaa lagu sheegay, qiyaastii 4,000 oo qof oo da'doodu tahay 6 jir ilaa 11 sano jir iyo 30,000 oo qof oo da'doodu tahay 12 sano jir iyo wixii ka weyn inay qaateen ugu yaraan 1 garoojo oo ah Tallaalka Moderna ee COVID-19.

Malaayiin qof oo da'doodu tahay 6 sano iyo wixii ka weyn ayaa qaatay Tallaalka Moderna ee COVID-19, La Cusbooneysiiyay (Tallaalka Asalka ah iyo Omicron BA.4/BA.5) ee haysta Oggolaanshaha Isticmaalka Degdeggaah (EUA). Gudaha tijaabada caafimaad, ku dhawaad 400 oo qof oo da'doodu tahay 18 iyo kawayn ayaa qaatay 1 garoojo oo tallaalka la cusbooneysiiyay kaasoo ka duwan tallaalka Moderna ee COVID-19, La Cusbooneysiiyay maadaama uu ka kooban yahay qayb tallaalka Omicron ah oo duwan.

WAA MAXAY FAA'IIDOOYINKA TALLAALADAAN?

Tallaalka Moderna ee COVID-19 waxaa la muujiyay inuu kahortago COVID-19. FDA waxay oggolaadeen Tallaalka Moderna COVID-19, La Cusbooneysiisay si uu u bixiyo kahortag wanaagsan oo ka dhan ah COVID-19 oo uu sababay nooca Omicron ee SARS-CoV-2.

Mudada uu difaaci karo COVID-19 waqtigaan lama oga.

WAA MAXAY HALISTA AY LEEYIHIIN TALLAALADANI?

Waa wax aan aad u badnayn in tallaalka uu sababi karo xasaasiyad daran. Xasaasiyadda daran waxay caadiyan dhici kartaa dhowr daqiiqo ilaa hal saacad gudahooda markii la qaato garoojada. Sababtaan darteed, bixiyaha tallaalka canugaaga ayaa weydiin kara meesha canugaaga uu kusoo qaatay tallaalka si uu ula socdo tallaalka kadib. Calaamadaha xasaasiyadda daran waxaa ku jiri kara:

- Neefsashada oo adkaata
- Barar wajiga iyo cunaha ah
- Wadne garaac degdeg ah
- Firiiric ka soo yaaca jirka oo dhan
- Wareer iyo tabardarro

Bararka murqaha wadnaha (bararka ku yimaada murqaha wadnaha) ama bararka xuubka sare ee wadnaha (bararka ku yimaada xuubabka sare ee wadnaha) ayaa ku dhacay dadka qaatay Tallaalka Moderna ee COVID-19 iyo Tallaalka Moderna ee COVID-19, La Cusbooneysiisay qaarkood. Dadkan qaarkood, astaamaha ayaa ku bilowda dhowr maalmood kadib tallaalka. In arrinkaani dhaco aad ayay u yartahay. Waa inaad daryeel caafimaad durba u raadisaa hadduu ilmahaagu wax ka mid ah astaamahaan aad ku aragto kadib markuu qaato tallaalka, gaar ahaan inta lagu gudajiro 2-da toddobaad kadib markuu ilmahaagu qaato garoojada tallaalka:

- Xabad xanuun
- Neefta oo yaraato ama neefsashada oo dhib ah
- In aad dareemeyso inay neeftaadu degdeg tahay, wadnaha oo ruxanaaya ama aad u garaacmaya
- Miyir-beelid/Suuxid
- Carro ama xanaaq aan caadi ahayn oo joogto ah
- Quudin liidata oo aan caadi ahayn oo joogto ah
- Daal ama tamar la'aan aan caadi ahayn oo joogto ah
- Matag joogto ah
- Xannuun joogto ah oo ka jira caloosha
- Jir qabow ama barraxa ah oo aan caadi ahayn oo joogto ah

Wax dhimaalada lagu soo tebiyay tijaabooyinka caafimaad ee lagu sameeyay tallaaladaan waxaa ku jira:

- Falcelinta goobta durriinka: xanuunka, jilicsanaanta iyo bararka qanjirada ee ku yaala isla cududda la duray ama gumaarka, gaduudasho iyo barar (adkaanta)
- Wax dhimaadlada guud: daal, madax xanuun, murqo xanuun, qarqaryo, lallabo iyo matag, qandhada, kala-goys xannuun, xanaaq/oohin, hurdo-la'aan, iyo cunto cunid xumo

Waxdhimaalada la soo sheegay inta lagu guda jiray oggolaanshaha isticmaalka dambe waxaa ku

jira:

- Falcelinta xasaasiyadeed ee daran
- Urtikaria (finan cuncun leh/firiiric)
- Bararka murqaha wadnaha (bararka ku yimaada murqaha wadnaha)
- Bararka xuubka sare ee wadnaha (bararka ku yimaada xuubabka sare ee wadnaha)
- Diidid la dareemo marka qofka tallaalka lagu durayo

Waxaa dhici karta inaysan dhicin wax dhimaalada suurtagalka ah dhammaantood ee tallaaladaan. Waxyeello halis ah oo aan la fileyn ayaa dhici karta. Waxyeelooyinka suurtagalka ah ee tallaaladan wali waa la daraaseeyaa.

MAXAAN KA YEELAYAA WAXYEELADIISA?

Haddii xasaasiyad daran uu canugaagu la kulmo, soo wac 9-1-1, ama aad isbitaalka kuugu dhow.

Wac bixiyaha tallaalka ama bixiyaha caafimaadka ee canugaaga haddii canugaaga ay kasoo gaaraan waxyeello dhiba ama aanan baxayn.

U soo sheeg wax dhimaalada tallaalka **Nidaamka Soo Tebinta Dhacdada Daran ee Tallaalka ee FDA/CDC (VAERS)**. Lambarka lacag la'aanta lagu soo waco ee VAERS waa 1-800-822-7967 ama onlayn kusoo gudbi <https://vaers.hhs.gov/reportevent.html>. Fadlan ugu dar “Oggolaanshaha Isticmaalka Degdegga ah (EUA) ee Tallalka Moderna ee COVID-19,” ama “Oggolaanshaha Isticmaalka Degdegga ah (EUA) ee Tallalka Moderna ee COVID-19, La Cusbooneysiiyay”, sida habboon, ee ku jira xarriiqda ugu horreysa ee sanduuqa #18 ee foomka wargelinta.

Intaas waxaa dheer, waxaad ugu soo sheegi kartaa waxdhimaalada shirkadda ModernaTX, Inc lambarka 1-866-MODERNA (1-866-663- 3762).

Waxaa sidoo kale lagu siin karaa xulasho aad isaga diiwaangaliso **v-safe**. **V-safe** waa aalad cusub oo ikhtiyaari ah oo ku saleysan taleefannada casriga ah oo adeegsata fariimaha qoraalka iyo xog-uruurin mareegeed si loola socdo dadka la tallaalay oo loo aqoonsado waxdhimaalada iman kara kadib tallaalka COVID-19. **V-safe** waxay ku weydiin su'aalo kaa caawinaya CDC la socodka badqabka tallaalada COVID-19. **V-safe** waxay sidoo kale bixisaa xusuusinta garoojada haddii loo baahdo iyo dabagalka taleefanka ee tooska ah ee ay sameyso CDC haddii kaqeybgalayaashu ay soo sheegaan saameyn caafimaad oo weyn kadib talaalka COVID-19. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida la isu diiwaan galiyo, booqo: www.cdc.gov/vsafe.

MAXAA DHACAYA HADDII AAN GO'AANSADO ILMAHAYGU INUUSAN QAADAN TALLAALKA MODERNA EE COVID-19, AMA TALLAALKA MODERNA EE COVID-19, LA CUSBOONEYSIIYAY?

Sida Isticmaalka Xaaladda Degdegga ah (EUA) sheegayo, waxa jira ikhtiyaar qofku aqbali karo ama diidi karo qaadashada tallaalka. Haddii aad go'aansato in canugaagu uusan qaadan wax ka mid ah tallaaladan midkood, taasi baddalimayso daryeelka caafimaadka ee canugaaga ee heerka la wada aqbalo gaarsiisan.

MA JIRAAN IKHTIYAARO KALE OO LOOGA HORTAGAYO COVID-19 MARKA LAGA SOO TAGO STALLAALKA MODERNA EE COVID-19, AMA TALLALKA MODERNA EE COVID-19, LA CUSBOONEYSIIYAY?

Tallaalida aasaasiga ah ee carruurta da'doodu u dhaxayso 6 bilood ilaa 5 sano jir, tallaalada kale ee looga hortago COVID-19 ayaa laga yaabaa in lagu helo Oggolaanshaha Isticmaalka Degdegga ah (EUA). Tallaalka xoojiyaha ah ee loogu talagalay carruurta da'doodu tahay 5 sano ee qaatay tallaalkooda aasaasiga ah ee tallaalka COVID-19 ay FDA oggolaadeen, tallaallada kale ee la cusbooneysiisay ee ay ku jiraan qaybta Omicron ee caabuqa SARS-CoV-2 ayaa laga yaabaa in lagu helo Oggolaanshaha Isticmaalka Degdegga ah (EUA). Tallaalka xoojiyaha ah ee loogu talagalay carruurta da'doodu u dhaxayso 6 bilood ilaa 4 sano jir ee qaateen tallaalkooda aasaasiga ah ee Tallaalka Moderna ee COVID-19, Tallaalka Moderna ee COVID-19, La Cusbooneysiisay waa kaliya tallaalka lagu heli karo Oggolaanshaha Isticmaalka Degdegga ah (EUA).

MIYUU ILMAHAYGU HELI KARAA TALLAALKA MODERNA EE COVID-19, AMA TALLALKA MODERNA EE COVID-19, LA CUSBOONEYSIIYAY ISLA MARKA UU QAADANAYO TALLAALADA KALE?

Xogta weli looma soo gudbin FDA si loo bixiyo Tallaalka Moderna ee COVID-19 ama Tallaalka Moderna ee COVID-19, La Cusbooneysiisay isla marka aan qaadanayo tallaalada kale. Haddii aad tixgelinayso inuu ilmahaagu la qaato Tallaalka Moderna ee COVID-19, ama Tallalka Moderna ee COVID-19, La Cusbooneysiisay tallaalada kale, kala hadal ikhtiyaaradaada bixiyaha daryeelka caafimaadka ee ilmahaaga.

MAXAA DHACAYA HADDII DIFAACA JIRKA EE CANUGEYGA UU LIITO?

Haddii canugaaga difaaca jirkiisu liito, waxaa lagu siin karaa xulasho ah in canugaagu qaato garoojada saddexaad ee aasaasiga ee tallaalka isxigxiga ee Tallaalka Moderna COVID-19. Carruurta difaaca jirkoodu hooseeyo oo da'doodu u dhaxayso 6 bilood ilaa 5 sano jir ee qaatay tallaalkooda aasaasiga ah ee Tallaalka Moderna ee COVID-19 waxaa laga yaabaa inay helaan hal garoojo oo xoojin ah oo ah Tallaalka Moderna ee COVID-19, La Cusbooneysiisay. Tallaaladu waxaa laga yaabaa inayna siin dadka difaacoogu liito difaac dhammaystiran oo ka dhan ah COVID-19, waana inaad sii waddo inaad joogtayso inuu dadka ka fogaado ilmahaaga si aad gacan uga gaysato kahortagga COVID-19. Dadka ka ag dhow ilmaahaaga waa inay tallaalan yihiin sida habboon.

MIYAA TALLAALADAN UU CANUGEYGU KA QAADI DOONAA COVID-19?

Maya. Tallaaladan kuma jiro SARS-CoV-2 kamana qaadi karo canugaagu COVID-19.


XAFIDO KAARKA TALLAALKA EE CANUGAAGA

Marka canugaagu qaato tallaalka COVID-19 ee koowaad, waxaad heli doontaa kaarka tallaalka. Xasusnoow inaad la timaado kaarka markaad soo laabanayso.

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Haddii aad qabto su'aalo, booqo mareegta ama soo garaac taleefan lambarrada hoos lagu qoray.

Si aad u hesho Xaanshidii Xaqiiqda ee ugu dambaysay, fadlan iskaan garee koodhka QR ee hoos lagu qoray.

Mareegta Tallaalka Moderna ee COVID-19	Geli lambarka taleefoonka
www.modernatx.com/covid19vaccine-eua 	1-866-MODERNA (1-866-663-3762)

SIDEEN INTAAN WAX KA BADAN U OGAAN KARAA?

- Weydii bixiyaha tallaalka
- Ka booqo mareegta CDC barta <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/index.html>
- Ka booqo FDA barta <https://www.fda.gov/emergency-preparedness-and-response/mcm-legal-regulatory-and-policy-framework/emergency-use-authorization>
- La xiriir waaxda caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga ama gobolkaaga

XAGEE AYAA XOGTA TALLAALKA EE CANUGEYGA LAGU KEYDINAYAA?

Bixiyaha tallaalka ayaa laga yaabaa inuu kusoo daro xogta tallaalka ee canugaaga Nidaamka Xogta Tallaalka ee deegaankaaga maxalliga ah/gobolka (IIS) ama nidaam kale oo loo qoondeeyay. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan IISs, booqo: <https://www.cdc.gov/vaccines/programs/iis/about.html>.

MIYAA LA IGU SOO DALLACAYAA KHIDMAD MAAMUL OO LOOGU TALAGALAY QAADASHADA TALLAALADAAN COVID-19?

Maya. Waqti xaadirkan, bixiyuhu kuguma soo dallici karo khidmadda garoojada tallaalka oo laguguma karo khidmadda hawl-socodsiinta tallaalka ee jeebkaaga aad ka bixinayso ama khidmadkale haddii uun aad qaadanayso tallaalka COVID-19. Si kastaba ha ahaatee, bixiyeyaasha tallaalka ayaa dooni kara dib u soo celinta habboon ee khidmadaha ku baxay barnaamijka ama qorshaha daboolka khidmadda hawl-socodsiinta ee loogu talagalay tallaalka COVID-19 ee loogu talagalay dadka qaadanaya tallaalka (caymiska gaarka ah, Medicare, Medicaid, HRSA COVID-19 Barnaamijka Dadka Aan La Caymin ee loogu talagalay dadka qaadanaya tallaalka ee aan la caymiska haysan).

XAGEEN U SOO TEBIN KARAA KIISASKA XATOYADA EE LAGA SHAKIYO?

Dadkii ogaada xadgudubyo dhici kara oo ka dhan ah Barnaamijka Tallaalka ee COVID-19 ee CDC waxaa lagu dhiirigelinayaa ina y usoo tebiyaan Xafiiska Baaraha Guud, Waaxda Mareykanka ee Caafimaadka iyo Adeegyada Insaanka ayagoo soo garaacaya 1-800-HHS-TIPS

ama TIPS.HHS.GOV.

WAA MAXAY BARNAAMIJKA TALLAABOYINKA LOOGA HORTAGO MAGDHAWGA DHAAWACA?

Barnaamijka Tillaabooyinka Ka-hortagga ee Magdhawga Dhaawaca (CICP) waa barnaamij heer federaal ah oo gacan ka geysan kara bixinta qarashka daryeelka caafimaadka iyo qarashyo kale oo gaar ah oo loogu talagalay dad gaar ah oo si halis ah ugu dhaawacmay dawooyin ama tallaalo, ay tallaaladan kujiraan. Guud ahaan, sheegasho waa in loo soo gudbiyo CICP hal (1) sano gudihii laga bilaabo taariikhda maalinta la qaatay tallaalka. Si aad wax badan uga ogaato barnaamijkaan, booqo www.hrsa.gov/cicp/ ama wac 1-855-266-2427.

WAA MAXAY OGOLAANSHAHA U ISTICMAALKA XAALADDA DEGDEGGA AH (EUA)?

EUA waa qaab lagu fududeeyo helitaanka iyo isticmaalka baddecadaha caafimaad oo ay ku jiraan tallaalada inta ay socdaan xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka dadweynaha sida safmareenka haatan socda ee COVID-19. EUA waxaa taageera ku dhawaaqida Xoghayaha Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (HHS) in daruufo jiraan loogu cudurdaarayo isticmaalka degdegga ah ee daawada iyo baddeecooyinka noolaha ah inta uu socdo safmareenka COVID-19. Baddeeco la oggolaaday in si degdegga ah loo isticmaalo ma aysan marin isla nooca dib u eegista ee FDA sameyso sida baddeecadda ay ansixin ka heshay FDA.

FDA waxaa laga yaabaa inay soo saaraan EUA markii shardi gaar ah la waafaqo taasoo ay k ujirto inaysan jirin beddello la heli karo oo ku filan oo la ansixiyay. Intaas waxaa dheer, go'aanka FDA waxaa uu ku salaysan yahay guud ahaanshaha caddeynta sayniska ee la heli karo ee muujinaysa in baddeecadu wax-ku-ool u tahay kahortagga COVID-19 inta uu jiro safmareenka COVID-19 oo faa'iidooyinka la ogsoon yahay iyo suurtagalka ah ee baddeecada ay ka badan yihiin halista la ogsoon yahay iyo suurtagalka ah ee baddeecada. Shardigaas oo dhan waa in la buuxiyo si loo oggolaado baddeecada in la isticmaalo inta uu jiro safmareenka COVID-19.

EUA ayaa shaqeynaya muddada ku dhawaaqista EUA COVID-19 taasoo u cudurdaareysa isticmaalka degdegga ah ee baddeecadan, haddii aan la joojin ama aan laga noqon (taasoo markaas kadib baddeecada aan la sii isticmaali karin).

Shirkadda Moderna US, Inc.
Cambridge, MA 02139

©2022 Shirkadda ModernaTX, Inc. Xuquuqaha oo dhan way dhowrsan yihiin.

Bukaan-ka(ada): www.modernatx.com/patents

Dib loo eegay: Diseembar/7/2022



Iskaan garee si aad u duubto in Xaashidaan Xaqiiqda la siiyey qofka tallaalka la siiyay si loo galiyo diiwaanka caafimaadka ee elektaroonigga ah/nidaamyada xogta tallaalka.

GDTI: 0886983000516

PN 1130805 (12/12/2022)